Somali

Waxa aad samaynayso haddii aad u malaynayso in go’aanka ku saabsan Dheeftaada Guriyeyn uu yahay qalad

(What to do if you think the decision about your Housing Benefit or Council Tax Benefit is wrong)

Warqaddan-yare daabacani waxay sharxaysaa waxa aad samaynayso haddii aad u malaynayso in go’aanka ku saabsan Dheeftaada Guriyeyn iyo/ama Dheeftaada Cashuur Kawnsal ay yihiin qalad. Qawaaniintu waa heer qaran waana isku mid meelkasta ood ku nooshahay Haddii aanad garanayn kawnsalka ku shaqada deegaanka aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka.

Hordhac

Marka aad codsato Dheef Guriyen iyo/ama Dheef Cashuur Kawnsal, waxa laguu soo diri doonaa warqad go'aanka codsi-gaaga ku saabsan. Haddii aad diidan-tahay go'aanka, waxad codsan karaysaa in dib loo hubiyo markale.

Waxa jira siyaabo kala duwan ood sidaasi ku samayn karayso. Waxad la xidhiidha Qaybta Dheefta ee Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga si aad:

- U waydiisato in ay sharax kaa siiyaan go'aanka
- U waydiisato in ay dib u hubiyaan go'aanka
- Rafcaan uga qaadato go'aanka.

Si aad u codsato ikhtiyaaradan midkood, waa in aad tahay qofka ay arintu saamaysay.

Waa kee qofka ay saamaysay?

Qofka ay saamaysay waxa weeye:

- Codsadaha
- Qof wakiil ka ah codsadaha ooy maxkamaduhu magacaabeen
- Qof ay Kawnsalku ogolaadeen ayaa loo magacaabaa in uu wakiil ka noqdo codsadaha
- Kireeyaha – laakiin arimaha la xidhiidha cidda dheefta lacag-bixinta la siinayo oo keliya
- Wakiilka - laakiin arimaha la xidhiidha cidda dheefta lacag-bixinta la siinayo oo keliya
- Cidkasta o go'aan laga gaadho in lacag siyaado ah oo la siiyey dib looga soo ceshado.

Taasi macneheedu waxa weeye in uu codsadaha oo keliyi Kawnsalka waydiisan karo in ay dib u eegaan go'aan khuseeya xisaabinta waxa uu xaqa u leehay codsaduhu. Kireeyaha ama wakiilku waxa keliya ooy Kawnsalka waydiisan karayaan in dib loo saxo go'aan ku saabsan lacag-bixinta la siinayo kireeyaha iyo la hubiyo haddii lacag soo ceshadka siyaadada ah ee laga doonayo kireeyaha ama wakiilka sax loo sameeyey.

Qoraalo muhiim ah

Qadarka dheefta la bixin karayaa waxa weeye arin ka dhexaysa Kawnsalka iyo codsadaha. Kiraystaha oo keliya ayaa waydiisan karaya Kawnsalka in ay dib u eegaan dheefta la bixin karayo. Haddii u Kawnsalku hoos u dhigo dheefta kiraystaha si ay dib ugu soo ceshadaan lacag dul-saar ah oo cinwaan hore lagu siiyey kireeyaha iminka rafcaan kama qaadan karayo go'aanka Kawnsalku dib ugu soo ceshanyo lacag-bixinta siyaadada ah.

Kireeye-yaasha iyo rafcaanada

Kireeye-yaashu waxay haystaan oo keliya xuquuq rafcaan-qaadasho xaddidan haddii ay diidaan go'aanada ku saabsan dheefta guriyeynta kirayste-yaashooda.

- Kireeyaashu rafcaan ayey qaadan karayaan haddii uu g'aanku yahay in aan dheefta toos loo siin kireeyaha
- Kireeyaashu rafcaan ayey qaadan karayaan haddii la waydiistay in ay lacag-bixin siyaado ah dib usoo celiyaan marka lacag fara badan la siiyo mid kirayste-yaashooda ka mid
- Laakiin kirayste-yaashu rafcaan kama qaadan karaan inta ay leegtahay dheefta ay helayaan kirayste-yaashu.

Waa maxay Gunaada Guriyeynta Deegaanku (LHA)?

Gunaada Guriyeynta Deegaanku (LHA) waxa weeye habka loo xisaabiyo Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad heli karayso. Qadarka aad helaysaa wuxu weli ku xidhan-yahay dakhliga iyo kaydka aad haysato. Waxanu ku baahin doonaa heeraka (LHA) websayt-kayaga.

Maxaan sameeyaa haddii aan diidanahay heerka Gunaada Guriyeynta Deegaanku (LHA)?

Rafcaan kama qaadan karaysid heerka Gunnada Guriyeynta Deegaanka (LHA) ama Golaha Meelaha Kirada Suuqa (BRMA) ay ku salaysan-yihiin. LHA ma saamayso cidkasta. Wixii macluumaad dheeraad ah waxad ka eegtaa warqadda ‘Tilmaamta Gunnada Guriyeynta Deegaanka’.

Haddii ay jiraan contooyin qayb ka ah kiraysi-gaaga, waxad codsan karaysaa dib u go’aamin. Adeega Kiradu xisaabta kuma darsado dakhli-gaaga marka ay dib u-goaaminayaan, sidaasi awgeed sababaha aad ku codsanayso dib u-goaamin waa in aanay noqon heerka dakhli-gaaga. Sarkaal ka tirsan Adeega Kirada oo ka duwan kii deegaankii hore ayaa eegi doona qiimeyntii markii hore oo warqad kuu soo diri doonaa si ay kuugu sheegaan go’aan-kooda.

Go’aano aanad rafcaan ka qaadan karayn

Waxad waydiisan karaysaa go’aan kasta ood u-malaynayso in uu qalad ayhay in la eego markale. Laakiin waxa jira go’aano aanad rafcaan u qaadan karayn maxkamad tusaale ahaan go’aanada:

- Ku saabsan macluumadka iyo caddaynta loo baahan-yahay in aad soo diyaariso
- In aan la aqbali codsi dib uga dhacay in la bedelo goaan
- In aad soo celiso lacag haddii la gaabisay in aad Kawnsalka u sheegto isbedel
- In lacagta jeeg lagugu siiyo ama inta jeere la bixinayo
- Haddii lacag-bixin siyaado ah dib lagaaga magdhabanyo haddii xaq loo leeyahay sidaasi in la sameeyo
- Sidaa lacagta siyaadada ah lagaaga magdhabanayo
- Go’aan-qaadashada Lacag-bixinta Guriyeyn

Bayaan sababo

Qofka ay saamaysaa wuxu ka codsan karayaa Kawnsalku in uu siiyo Bayaan Sababo qoraal ah. Bayaanka Sababo ma saamaynayo xaqa aad u leedahay in aad rafcaan qaadato. Bayaanku wuxu sharxayaa sida uu Kawnsalku ku gaadhay go’aan-kiisa. Waqti ay Kawnsalka ku qaadato si ay u diyaariyaan bayaanka wuxu fidin doonaa waqtiga loo xaddiday codsiga dib hubinta ama raadsashada rafcaan u qaadasho Adeeg Maxkamadeed.

Maxaan sameeyaa haddii aan doonayo in go’aanka markale la eego?

Waa in aad warqad u dirto Qaybta Dheefta ee Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga muddo **hal bil ah** gudeheed lag abilaabo taariikhda warqadda go’aanka. Haddii ay jiraan duruufo khaas ah oo aanad bil gudeheed warqaddaasi ku soo gudbin karayn, waa in aad la

xidhiidho Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga si aad ugu sharaxdo waayo waxa laga yaabaa in ay weli awoodi karayaan in ay go'aanka markale eegaan.

Maxaa dhacaya marka go'aanka la eego markale?

Waxa go'aanka hubin doona sarkaal ka duwan kii go'aankii hore sameeyey, si loo eego go'aanku in uu sax ah.

Haddii go'aanka la bedeli karayo:

Haddii go'aanka la bedeli karayo waxa dib loogu saxi doonaa taariikhdii go'aankii hore.

Waxa laguu soo diri doonaa warqad lagu sharxayo go'aanka cusub.

Haddii aan go'aanka la bedeli karayn

Haddii, ka dib eegitaanka go'aanka markale, aan la bedeli karayn, waxa laguu soo diri doonaa warqad lagu sharxayo sababtu waxa ay tahay.

Markaasi waxad haystaa **hal bil ah oo kale** ood rafcaan u qaadan karaysid Adeega Maxkamadda.

Waxan doonayaa in rafcaan ka qaato go'aanka. Maxaan sameeya?

Waa in aad rafcaan qoraal ah qaadatid, adiga oo warqad qoraya ama buuxinaya foomka rafcaanka mid ahaan, kaasood ka heli karayso Qaybta Dheefta ee Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. Waa in aad u dirto rafcaan-kaaga xafiiska lagu muujiyey warqadda go'aanka la gaadhay **muddo bil gudeheed** ah laga bilaabo taariikhda warqaddaasi.

Adeega Maxkamddu waxay rafcaan-kaaga go'aan kaga gaadhi doonaan maxkamad dhegaysi ah. Dhegaysiga maxkamddu waxay ka kooban yihiin dad aan ka tirsanayn Kawnsalka.

Waxa weeye muhiiim in aad bixiso sababta aad rafcaanka u qaadanayso waayo maxkamaddu ma eegayso waxkasta oo aanad ku sheegi warqaddaada ama foomka rafcaanka. Maxkamaddu waxay eegaysaa oo keliya caddayn, sharciga iyo duruufaha, waqtiga go'aanka aad rafcaanka ka qaadatay la sameeyey.

Xasuunow, haddii ay maxkamadda rafcaanku kugu helaan in aad qaadan jirtay lacag fara badan, dheeftaada hoos ayaa loo dhigayaa.

Macluumaad dheeraad ah

Wixi imacluumaad dheeraad ah eek u saabsan rafcaanada iyo Adeega Maxkamadaha, fadlan booqo websaytka www.benefit-leaflets.org kaasoo toos kuugu xidhaya codsiyada Adeega Maxkamadaha.

Halkee ayaan ka heli karayaa nasteexo dheeraad ah?

Haddii aad u baahan-tahay caawimaad dheeraad ah ama nasteexo, waxad la xidhiidha Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. (Waxad ka heli karaysaa faah-faahinta sida loola xidhiidhayo biil-kaaga Cashuurta Kawnsalkal).

Nasteexo madax-bannaan - Haddii aad u baahan-tahay talo-siin madax-bannaan,la xidhiidh Xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta ee ku yaal degaanka. Waxad ka heli karaysaa lamabrka tilifoonkooda iyo wakiilo kale oo dadka degaanka la taliya Buuga Tilifoonadan, maktabada ku taal deegaan-kaaga ama adiga oo la xidhiidhaya Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far waaweyn, far Indhoole, werin cajaladeed iyo luuqado kale. Wixii macluumaad dheeraad ah waxad booqataa websaytka www.benefit-leaflets.org.